

3Labo jibbaarka VT (3SquaresVT)

*Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah ee Vermont
(ee horay loogu aqoon jiray Kaarka Cuntada (Food Stamps))*

Su'aalaha iyo Jawaabaha Loogu Talo galay Dadka Muhaajiriinta ah

Ma dhibaato ayaa iga qabsan doonta in aan qaato green card-kayga haddii aan qaato faa'iidooyinka 3SquaresVT?

Maya. Qaadashada faa'iidooyinka 3SquaresVT ama kaalmada kale ee aan lacagta caddaanka ah ahayn wax kuu dhimi meyso marka aad codsaneyso green card-ka.

Miyuu ilmahaygu qaadan karaa faa'iidooyinka 3SquaresVT xataa haddii aanan anigu u qalmin?

Haa. Haddii aadan sharci lahayn ama aadan naftaadu qaadan karaynin faa'iidooyinka 3SquaresVT, ilmaha sida sharciga ah u deggan waddanka ee ka yar da'da 18 way qaadan karaan faa'iidooyinka. Haddii aad adigoo ilmahaaga wakiil ka ah aad codsatid 3SquaresVT, lagaagama baahna in aad bixiso lambarkaaga nabad sugidda (social security number) ama aad ka jawaabtid su'aalaha sharciyadda aad waddanka ku joogtid. Si kastaba ha ahaatee, waa in aad bixisaa warka ku saabsan dakhligaaga iyo ilahaaga dhaqaale.

Haddii aan codsado 3SquaresVT, miyaa dadka ila nool laga doonayaa in ay ka jawaabaan su'aalaha ku saabsan sharciga ay waddanka ku joogaan?

Dadka doonaya in ay qaataan faa'iidooyinka 3SquaresVT oo keliya ayaa laga doonayaa in ay ka jawaabaan su'aalaha ku saabsan sharciga ay waddanka ku joogaan. Dadka ku nool guriga aan dooneyn in ay qaataan faa'iidooyinka 3SquaresVT lagama rabo in ay keenaan wax waraaqo socdaal ah ama ay bixiyaan lambarka nabadsugidda bulshada (social security number) laakiin waa in ay bixiyaan warka ku saabsan dakhligooda iyo ilahooda dhaqaale.

Miyey Waaxda Carruurta iyo Qaybta Adeegyada Dhaqaalaha Qoysku (Department for Children and Families Economic Services Division (ESD)) ii sheegayaan Waaxda Dhaqan Gelinta Socdaalka iyo Canshuuraha (Immigration & Customs Enforcement (ICE) haddii aan diido in aan ka jawaabo su'aalaha ku saabsan sharcigayga?

Maya. Haddii aadan dooneyn in aad ka jaaabtid su'aalaha ku saabsan sharciga aad waddanka ku joogtid, DCF iyo ESD looma oggola in ay ku weydiiyaan wax su'aalo ah ama isku dayaan in ay sharciga aad waddanka ku joogtid ka ogaadaan qof kasta oo kale. Kuuma sheegi doonaan ICE. Si kasta ha ahaatee, haddii ay caddeyn u hayaan in aadan sharci lahayn, markaas waxaa looga baahan yahay in ay ku wargeliyaan ICE.

Ma heli karaa turjumaan iga caawiya in aan codsado faa'iidooyinka 3SquaresVT?

Haa. Haddii aad u baahan tahay qof kaa caawiya la xiriiidda qofka kaala shaqeeya DCF/ESD, waxaad weydiisan kartaa turjumaan, ka dibna ESD ayaa bixin doonta lacagta turjumaanka.

Waxaan codsaday 3SquaresVT waana la ii diiday. Maxaan sameyn karaa ?

Haddii aad u maleynayso in aad u qalantid faa'iidooyinka 3SquaresVT, rafcaan ayaad ka qaadan kartaa go'aanka ESD. Waa in aad rafcaan ku soo gudbisataa muddo 90 maalmood gudahooda ah adigoo warqad u soo qoraya ama soo wacaya xafiiska ESD (warqad u soo qoridda ayaa ah habka ugu wanaagsan). Hay'adda Kaalmada Sharciga Vermont ama Khadka Adeegyada Sharcigu (Vermont Legal Aid or Legal Services Law Line) waxay ku siin karaan qareen ama sharciyaqaan kula hadla.

Haddii aad u baahan tahay caawimo ama aad su'aalo qabtid, fadlan soo wac hay'adda Vermont Legal Aid oo laga helo 1-800-769-7459.



Fartiintaan waxaa qayb ahaan maalgeliyey USDA, adeeg bixiye iyo shaqaaleeye fursaddiisa loo siman yahay.

4/10/09

